



Guadalupe Guerrero

Guddoomiyaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland

Guadalupe Guerrero wuxuu waqtigan xadirka ah yahay Guddoomiyaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS), kaasi oo ah dugsiyada degmada ee ugu weyn Oregon. Marka aad eegto Guerrero oo ku jira mudaddii uu xilka guddoomiyaniimo hayey sanadkii shanaad ee sanad-dugsiyeedka PPS, degmadu waxay sii wadaa dadaaladii joogtada ahaa ee dib loogu qaabeynayey nidaamka dugsiyada, iyada oo la xaqiijinayo in arday waliba uu qalin-jabiyo **iyadoo uu u diyaarsan yahay sidii uu u hoggaamin lahaa isbedelka iyo horumarinta dunida.**



Hoggaaminta hagar la'aanta ah ee Guerrero, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay isku dayayaan iyada oo aan mugdi kaga jirin ka go'naanshaha ku wajahan aasaaskeeda iyo adkeysigeeda aaminsanaanta **sinaanta jinsiga iyo cadaalada bulshada.**

Intii u xilka hayey, dugsiyada degmadu waxay sameeyeen [aragti](#) ay abuurteen bulshadu iyada oo ay si fiican u qeexeen [qorshaha istaraatiijiyadeed](#) ee sanado fara badan. Wuxuu hoggaanka u siday dadaalada ugu muhiimsan ee ay ka midka yihiin in la dejiyo manhajka K-12 ee cadaalada cimilada, ballaarinta waxbarashada farshaxanka iyo xoojinta sidii loo qiimeyn lahaa in ardaydu cod ku yeeshaan golayaasha go'aanada lagu gaarayo. Mudaddii uu hoggaanka hayey, Guddoomiyaha Waxbarashada Guerrero wuxuu kala dabaashay xanuunkii faafayey ee COVID-19 isaga oo xooga saaray sidii waxbarashadu u socon lahayd iyada dhinaca kalena la ilaalinayo sidii qof kastaa u noqon lahaa mid ka nabadgala oo caafimaad qaba.

Sanadkii 2020, Dugsiyad Dadweynaha Portland (PPS) waxay heleen lacag dhan **\$1.2 bilyan oo dhaqaale lagu horumarinayo dugsiyada**— taasi oo ah dhaqaalihii lacageed ee taariikhda Oregon ugu badnaa. Markaad fiiriso tilmaamaha istaraatiijiyeed ee hoggaaminta Guddoomiyaha Waxbarashada Guerrero, dhaqaalaha lacageed waxaa loogu talagalay iyada oo gaar loogu yeelay gaar ahaan dib u cusbooneysiinta manhajka tobonaanka sanadood soo jiray iyo dardar galinta sidii ay PPS u noqon lahayn dugsi degmeed awood u leh teknoolajiga. Waxaa sidoo kale \$60 milyuun oo lacagtaasi loo qoondeeyey sidii loogu horumarin lahaa **Xarunta Tayeynta Ardayda Madowga ah**, taasi oo ah fikrad soo shaac-baxaysa ayna hoggaaminayaan bulshadu iyaga oo raadinaya inay mideeyaan korna u qaadaan waayo-aragnimada waxbarashada caruurta Madow ee Portland iyo qoysaskooda, inay ku xiraan dugsiyada iyo hay'ada ku salaysan bulshada ee Albina, Darisyada Portland ee taariikh ahaan ay deganayaan bulshada Madowga ahi.

Guddoomiyihii Waxbarasho PPS ee ugu horeeyey kana soo jeeda Laatiino, Guerrero wuxuu keenay in ka badan **25 sanno oo waayo-aragnimo ah**, sida kalkaaliye macallin, macallin fasal, maamulo dugsi iyo degmo, iyo dhawaan oo uu ahaan Ku-xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada dhinaca Casharada, Hal abuurka iyo Cadaalada Bulshada ee Dugsiyada Degmada Unified San Francisco (SFUSD).

Guddoomiye Guerrero waxay Ururada Maamulayaasha Laatiinaha iyo Guddoomiyaasha Waxbarashadu ay u magaacabeen **Guddoomiyaha Waxbarashada Heer Qaran ee Sanadka 2021**. Wuxuu ku tababaran yahay fiyooliin, wuxuu ku haystaa Shahaahada Koowaad Taariikhda isaga oo ka qaatay UCLA



iyo Labo Shahaado oo ah kuwa heerka labaad oo iyagana ka qaatay Jaamacada Harvard qeybteeda Culuunta Waxbarashada. Isaga iyo xaaskiisa oo ah macallimada dugsi hoose muddo dheer wax ka dhigaysa waxay leeyihiin labo caruur ah oo dhawaan ka qalin-jabiyey SFUSD.